

Foomka Codsiga iyo Gudbinta ee Barnaamijka Daaweynta Kansarka Naasaha iyo Afka Ilmo-galeenka (BCCTP, Breast and Cervical Cancer Treatment Program)

Si loogu qalmo macaashyada caafimaad ee Barnaamijka Daaweynta Kansarka Naasaha iyo Afka Ilmo-galeenka (BCCTP, Breast and Cervical Cancer Treatment Program), shaqsigu waa:

- Inuu buuxiyo shuruudaha u-qalmitaanka ee Barnaamijka Daaweynta Kansarka Naasaha iyo Afka Ilmo-galeenka;
- In la ogaaday inuu u baahan yahay in laga daaweeyo kansarka naasaha ama afka ilmo-galeenka, ama xaalado gaar ah oo kansarka hortiiisa dhaca;
- Inuu ka yar yahay 65 sano jir;
- In uusan lahayn caymis caafimaad oo ka bixiyo daaweynta; Caymiska caafimaadku waa:
 - Caymiska caafimaadka ee shaqsiyeed ama kooxeed;
 - Medicare;
 - Caymiska Caafimaadka ee Oregon (Medicaid);
 - Caymiska ciidamada qalabka sida;
 - Barnaamijka Kaalmada Caymiska Caafimaadka ee Qoyska (FHIAP, Family Health Insurance Assistance Program);
 - Kooxaha Caymiska Caafimaadka ee Oregon (OMIP, Oregon Medical Insurance Pool).

Fiiro gaar ah: Haddii caymis kale oo caafimaad uusan daboolin *daaweynta* kansarka naaska ama afka ilmo-galeenka, shakhsigu weli wuu u-qalmi karaa barnaamijka BCCTP.

Haddii uu shakhsigu u-qalmo, waaa inuu buuxiyo codsi caafimaad oo dhammaystiran. Haddii uu noo soo diri waayo macluumaadkan macaashka caafimaadkiisa ma sii socon doono.

- Shaqsigu waxaa laga yaabaa in loo sheego inuu buuxiyo foomam loogu talagalay barnaamijyada kale ee caafimaadka. Tani ayaa la sameeya si loo eego inuu macaashyada ka heli karo barnaamij kale.
- Shakhsiga sheegta inuu yahay muwaadin Ameerikaan ah ayaa loo sheegi karaa inuu keeno caddaynta dhalashada.
- Shakhsiga sheegta in uusan muwaadin ahayn ayaa loo sheegi karaa inuu keeno caddaynta xaaladda socdaalka. Wuu dooran karaa inuu sheego inuu bixin doonin caddaynta xaaladda socdaalka haddii uusan haysan wax dukumeenti ah. Haddii ay arrintu sidaasi tahay, waxaa laga yaabaa inuu u-qalmo macaashyada Healthier Oregon. Macaashyada Healthier Oregon waxay la mid yihiin macaashyada OHP ee buuxa waxaana ka mid ah daaweynta kansarka. Si aad wax badan u ogaato, booqo Oregon.gov/HealthierOregon.

Shakhsiga waxaa loo sheegi doonaa inuu bixiyo Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN). Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) ayaa looga baahan yahay qof kasta oo codsanaya macaashyada caafimaadka iyo kuwa macaashka qaata. Weli waad codsan kartaa macaashka caafimaadka xitaa haddii aadan haysan Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN).. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka SSN, waxa laga yaabaa inaan ku caawin karno. Waxaad naga soo wici kartaa lambarka 1-800-699-9075. Waxaad sidoo kale booqan kartaa www.socialsecurity.gov, ama ka wac Maamulka Sugnaanta Bulshada lambarka 1-800-772-1213 (TTY 1-800-325-0778).

Su'aalaha ku saabsan codsiga ayaa lagaaga jawaabi karaa adigoo adeegsanayo barta <https://www.oregon.gov/oha/HSD/OHP/Pages/BCCTP.aspx> ama adigoo ka wacaya Adeegga Macmiilka ee OHP (OHP Customer Service) lambarka 1-800-699-9075 (TTY 711). Weydii Kooxda BCCTP.

Meelaynta xuquuqda loo leeyahay macaashyada caafimaadka

Markuu codsanayo ama qaadanayo macaashyada caafimaadka, qofku wuxuu siinayaa Maamulka Caafimaadka ee Oregon (OHA, Oregon Health Authority) dhammaan xuquuqaha lagu siinayo taageero kasta oo caafimaad iyo lacagaha loogu talagalay qolo saddexaad oo qayb ka ah daryeelka caafimaadka. Tani waxay OHA u saamaxdaa inay lacag ka raadsato qolo kasta oo saddexaad oo mas'uul ka ah inay bixiso kharashka daryeelka caafimaadka ee qofka loogu talagalay.

Bayaanka sheegashada hantida

Marka qofku dhinto, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (Oregon Department of Human Services) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (ODHS|OHA) ayaa lacag ka jaran kara hantida qofka dhintay (*sida lagu qeexay xeerka ORS 414.104*). Qaddarka la jaran karo guud ahaan waxay la mid tahay caddada macaashyada caafimaad ee uu qofku helay 55 jir kadib. Haddii qofka si joogto ah xarun loo dhigay (*sida lagu qeexay xeerka OAR 461-135-0832*) marka uu dhiman rabo, macaashyada caafimaad ee la siiyay 55 jir kahor waa laga soo ceshan karaa. Lacagta ay tahay in lagu bixiyo macaashyada caafimaad ayaa laga jaran karaa hantida qofka marka uu dhiman rabo. Haddii uu qofku leeyahay lamaane nool, wax sheegasho ah lama samayn doono ilaa uu/ay ka dhimato. Haddii ay jiraan carruur nool oo ka yar 21 jir, wax sheegasho ah lama samayn doono. Haddii ay jiraan carruurta nool oo naafo ah, wax sheegasho ah lama samayn doono (ORS 115.125).

Lambarka Sugnaanta Bulshada

Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) ayaa looga baahan yahay inta badan dadka codsanaya macaashyada caafimaadka (42 USC Qeybta 1320b-7). Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) ayaa la isticmaali doonaa si:

- Loo hubiyo in qofna uusan macaashyo ka helin in ka badan hal qoys;
- Loo ogaado macaashyada uu qofku heli karo;
- Isbeddel loogu sameeyo tiro badan oo kiisas ah marba mid;
- Loo soo celiyo macaashyada dheeraadka ah;
- La iskugu aadiyo diiwaannadeena iyo diiwaanada dawladda dhexe iyo kuwa gobolka. Tusaale ahaan, Magdhawga Shaqo-la'aanta, Adeegga Dakhliga Gudaha, Caymiska Medicaid iyo Diiwaannada Sugnaanta Bulshada;

- Loo soo uruuriyo macluumaadka shaqaalaha loona sameeyo cilmi-baaris. Tani waxay ka caawisaa sharci-dajiyeyaasha iyo wakaaladaha inay wanaajiyaan adeegyada loogu talagalay reer Oregon.

Bayaanka takoor-La'aanta

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ma faquuqaan qofna. Tani ayaa ka dhigan in waaxda ODHS|OHA ay caawin doonto qof kasta oo u-qalma adeegga isla mar ahaantaana aysan qofna ula macaamili doonin si ka duwan sida ay ula macaamisho dadka kale iyadoo la eegayn da'da, isirka, midabka, asal qarameedka, jinsiga, aragtida siyaasadeed¹, naafonimada, ama nooca galmo ee qofka².

Waxaad soo gudbin kartaa cabasho haddii aad aamminsan tahay in mid ka mid ah sababahan awgood ay DHS ama OHA kuula dhaqantay qaab ka duwan dadka kale. Si aad usoo gudbiso cabasho, waxaad soo wici kartaa ama qoraal usoo diri kartaa Xafiiska U-doodista ee Badhasaabka Gobolka:

Xafiiska U-doodista ee Badhasaabka Gobolka
500 Summer Street NE, E17
Salem, OR 97301
503-945-6904, 1-800-442-5238, TTY 711
limaylka: DHS.INFO@ODHSOHA.OREGON.GOV
"Sharcigu wuxuu qabaa fursad loo siman yahay!"

¹SNAP macaamiisha waxaa laga dhowray in lagula kaco wax faquuqitaan ah oo la xiriira afkaartooda siyaasadeed.

²Aragtida ku saabsan arrimaha galmadu waa kuwo lagu dhawray shuruucda gobolka Oregon, hase ahaatee kuma jiraan shuruucda heer fedraal.

Xuquuqaha codsadhaha

- Inuu codsado wax ku saabsan barnaamijyada OHA, lacagaha iyo adeegyada.
- Inuu codsado barnaamijyada OHA.
- In si toolmoon oo caddaalad ah loola dhaqmo oo aan la takoorin.
- Inuu helo xamilitaan kasta oo macquul ah ee loogu talagalay dadka naafada ah sida uu qabo Xeerka Naafada Maraykanka.
- Inuu diido in uu oggolaado in la sii shaaciyo macluumaadka uu siiyo OHA haddii uu sharciyo farayo mooyee.
- Inuu codsado oo helo foomam kasta oo uu siiyo OHA.
- Inuu la hadlo halo qof mas'uul ah.
- Inuu codsado dacwad-dhageysi marka aad wax isku khilaaftaan. Waxaad haysataa 45 maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska oo aad arrintan ku samayso. Codsigu waa in lagu qoraa foomka Codsiga Dacwad-dhageysiga Maamulka (DHS 443). Foomkan waxaa laga heli karaa xafiis kasta oo OHA ah. Qof ka tirsan xafiiska ayaa kaa caawin kara buuxinta codsiga.
- Si aad u ogaato inaad u-qalanto macaashyada 45 maalmood gudahooda.

Mas'uuliyadaha saaran codsadhaha

Ugu dir fakis foomka la buuxiyay:
503-373-7493

- Bixinta macluumaad dhab ah, sax ah oo dhammaystiran.
- Soo sheegida isbeddelada soo socda 10 maalmood gudahooda:
 - Isbeddelada ku yimaada cinwaanka
 - Isbeddellada kale caymiska daryeelka caafimaadka (Medicare, caymiska gaarka ah, iwm.);
 - Soo sheeg haddii aad uur yeelato.
- Soo sheeg isbeddellada adigoo ka wacaya Adeegga Macmiilka ee OHP lambarka 1-800-699-9075.
- U soo sheeg bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka wixii caymiska kale ee daryeelka caafimaadka ah kahor inta aadan isticmaalin kaarka aqoonsiga caafimaadka.

Markaan saxiixo codsigan:

- Waxaan oggolaanayaa in OHA ay dib-u-eegis ku sameeyaan diiwaanada daryeelka caafimaadkayga. Waxaan oggolaanayaa in OHA ay la wadaagto diiwaanada daryeelka caafimaadkayga qandaraasleyaasha iyo bixiyayaasha daryeelka ee OHA.
- Waan fahamsanahay bayaanka sheegashada hantida.
- Waan fahamsanahay xuquuqaha aan leeyahay iyo mas'uuliyadaha i saaran sida kor lagu xusay.
- Waan fahamsanahay bayaanka sugnaanta bulshada.

Waxaan caddaynayaa in macluumaadka aan ku dhex bixiyay codsigan uu yahay mid dhab ah, sax ah oo dhammaystiran inta aan ogahay.

Dukumeentigan waxaa lagu bixin karaa marka lagu codsado qaabab kale oo ku aadan shakhsiyaadka naafada ah ama aan ku hadla luuqad aan ahayn Af-Ingiriisi ee loogu talagalay dadka si fiican aan u aqaanin Af-Ingiriisiga. Si aad foomkan ugu codsato qaab ama luuqad kale, kala xiriir Qorshaha Caafimaadka ee Oregon (OHP, Oregon Health Plan) lambarka 1-800-699-9075 ama TTY 1-800-735-2900

Foomka Codsiga iyo Gudbinta ee Barnaamijka Daaweynta Kansarka Naasaha iyo Afka Ilmo-galeenka (BCCTP, Breast and Cervical Cancer Treatment Program)

Bukaanka: Fadlan buuxi qeybta soo socota si aad macaashyada caafimaadka uga codsato barnaamijka BCCTP

Qaybta 1-aad — Qeybta bukaanka

Magaca codsadhaha:			Taariikhda:
Taariikhda dhalashada:	Lambarka Sugnaanta Bulshada:	Lambarka taleefoonka:	Lambarka farriimaha:

Cinwaanka guriga

Waddada:	Magaalada:	Gobalka:	Koodhka boostada:
----------	------------	----------	-------------------

Cinwaanka boostada: *(haddii uu ka duwan yahay)*

Waddada:	Magaalada:	Gobalka:	Koodhka boostada:
----------	------------	----------	-------------------

Tirada qoyska: *(Tirada qoyska ayaa ka kooban adiga, lamaanahaaga iyo carruurtaada haddii*

ay kula nool yihiin adiga, iyo qof kasta oo kale oo aad ku darto canshuur-celintaada) _____

Wadarta guud ee dakhliga qoyska ee billaha ah: *(canshuuraha kahor)* ____

Wadarta lacagaha la iska jaro ee billaha ah ee la canshuuri karo ee aad sheegan karto markaad canshuur-celin u gudbinaysa dowladda _____

Ma tahay muwaadin Ameerikaan ah ama haysta Haa Maya
Dhalasho Ameerikaan?

Ma tahay qof aan dhalasho lahayn oo si sharci ah ku Haa Maya
jooga dalka?

Ma haysataa nooc ka mid ah caymisyada Haa Maya
caafimaadka?

Kuwani waxaa ku jira Medicare, caymiska gaarka ah, iwm.

Haddii ay haa tahay, caymis nooc ee ah weeye? *(Bixi nuqulka kaarka caymiska, haddii la heli karo.)*

Su'aalaha soo socda ayaa naga caawin doona inaan go'aan ka gaarno inaad u-qalmi karto

barnaamij kale oo OHP ah.

Ma jiraa waalid/qaraabo ilmo (ka yar da'da 19 jir) oo gurigaaga jooga?	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Uur miyaad leedahay?	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Ma codsatay macaashyada loogu talagalay naafada?	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Miyaa lagu diiday macaashyada loogu talagalay naafada?	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Ma heshaa macaashyada loogu talagalay naafada?	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya

Waan akhriyay xuquuqaha aan leeyahay iyo waajibaadyada i saaran ee ku jira bogga 2-aad iyo 3-aad.

Haa Maya

(Saxiixa codsadhaha)

(Taariikhda)

Bixiyaha: Markaad akhrido Hagaha Codsiga iyo shuruudaha u-qalmitaanka, fadlan buuxi qeybta soo socota si aad u gaarto go'aanka loo qaateenka ah ee barnaamijka BCCTP ee loogu talagalay bukaankan:

Qaybta 2-aad — Qeybta Bixiyaha Daryeelka

Magaca bixiyaha:	Lambarka NPI:	Nooca takhasuska/shatiga:	
Magaca rugta caafimaadka:	Lambarka taleefoonka:	Lambarka farriimaha:	
Cinwaanka waddada:	Magaalada:	Gobalka:	Koodhka boostada:

Ogaanshaha Xaaladda

<p>Naaska:</p> <p><input type="checkbox"/> Kansarka naasaha ee faafa</p> <p><input type="checkbox"/> Kansarka ku dhaca xubnaha tuubbooyinka caanaha (DCIS)</p>	<p>Afka ilmo-galeenka:</p> <p><input type="checkbox"/> CIN 1 Joogtada ah (oo dhaca muddo ugu yaraan dhan 18 bilood)</p> <p><input type="checkbox"/> CIN 2 ama CIN 3</p> <p><input type="checkbox"/> Kansarka afka ilmo-galeenka ee faafa</p> <p><input type="checkbox"/> Unugyada kansarka ee aan faafin ee makaanka</p> <p><input type="checkbox"/> (AIS) Unugyada kansarka ee aan faafin (CIS)</p>
<p>Taariikhda ogaanshaha: _____</p> <p>(Tani waa taariikhda habraaca leh ee kansarka la ogaaday.)</p>	

Ma jiraan biilal caafimaad oo aan weli la bixin oo bukaanka lagu soo Haa Maya
dallacay oo la xiriira ogaanshaha xaaladdan?

Haddii ay haa tahay, qor taariikhda biilashan la soo dallacay: _____

Bukaanku miyuu buuxin karay shuruudaha u-qalmitaanka xilligii la Haa Maya
joogay taariikhda kor ku xusan?

Waxaan rabaa inaan ku helo si degdegeg ah lambarka aqoonsiga ee Haa Maya
samadheefsadaha:

Lambarka taleefoonka: _____

Magaca cidda lala xiriirayo: _____

Markaan saxiixo qaybta hoose, waxaan xaqiijinayaa in bukaanku buuxiyay shuruudaha u-
qalmitaanka ee ku jira bogga koowaad ee codsigan, macluumaadka ku qoran qaybtan waa
mid dhab ah oo dhammaystiran waana u qalmaa inaan sameeyo ogaanshaha xaaladdan.

(Saxiixa daryeel-bixiyaha)

(Taariikhda)